Hah-dhaqameedka Shaqo ee Shaqaalaha Daryeelidda Bulshada
Iyo
Hab-dhaqameedka Shaqo ee Shaqo-bixiyaha Shaqaalaha Daryeelka Bulshada

Sebtimber 2002

Shaqo-bixiyaha shaqaalaha daryeelka bulshada

Hordhac

Qoraalkan waxa ku jira hab-dhaqameedka shaqaalaha daryeelidda bulshada iyo shaqo-bixiyaha shaqaalaha daryeelidda bulshada taas oo qeexaysa sida shaqaaluhu ugu shaqayn lahaayeen dadka ay u adeegaan. Hordhacan oo dib u soo bixi doona waxa loogu tala galay in shaqo-bixiyaha iyo shaqaalaha daryeelka bulshadu ay ku wada shaqeeyaan dhammaantood. Hab-dhaqameedkan waxa loogu
tala-galay in aad fahamto, tilmaami kartana sida ay kuugu muuqdaan. Adigoo ka mida shaqaalaha daryeelidda bulshada, shaqo-bixiyayaasha, kuwa loogu adeego hab-dhaqankan. Amaba ah qof kale oo ka mida bulshada.

Xarunta Guud ee Dawladda Hoose ee Daryeelka Bulshada (The General Social Care Coucil) waxay bilwoday shaqadeeda 1 Oktober 2001. Isla markaa waxa iyana shaqadan bilowday Dawladda Hoose ee Woqooyig Ayrland ee Daryeelka Shaqaalaha (the Northern Ireland Social Care Council), Dawladda Hoose ee Iskotland ee Adeegga Bulshada (the Scottish Social Services Council) iyo Daryeelka Dawladda Hoose ee Weylis (the Care Council for Wales). Dawladda Hoose waxa xil ka saaran yahay sidii ay hore ugu marin lahayd hab-dhaqameedka shaqada ayagoo u wada shaqeeya isku- duubnaan si ay u hormariyaan habka wada shaqaynta korna ugu qaadaan heerka adeegidda daryeelka bulshada.

Labada hab-dhaqan ee ka shaqaalaha iyo ka shaqo-bixiyaha way ku qeexanyihiin qoraalkan waayo waxay u yihin xuddun ama muraayad masuuliyadda looga baahan yahay iyo hore-umarinteedaba.

Maxay yihiin hab-dhaqameedkani?

Hab-dhaqameedka Shaqo-bixiyaha ee Shaqada Daryeelka Bulshada wuxuu dhigayaa masuuliyadda looga baahanyahay shaqo bixiyaha waxaan lagu sii kordhiyey qawaaniinta u degsan shaqaalaha daryeelidda bulshada. Waana markii u horeysey ee la gaarsiiyo xadkan ilaa heerka qaran ah. Waxa habkani

muujinayaa in shaqo bixiyuhu ku dhaqmo qawaaniintan, inuu taageero ku siiyo shaqaalihiisan sidii ay u gudan lahaayeen hawshooda iyo sidii looga qaadi lahaa tallaabo cad marka shaqaaluhu gudan waayaan shaqadooda laga filayo ee dad-la-dhaqanka shaqada dhexdeeda.

Habdhaqameedka Shaqaalaha Daryeelidda Bulshada waa qoraal lagu qeexayo heerka hoggaaminta khibradeed iyo shaqada looga baahanyahay shaqaalaha daryeelidda bulsahada shaqo-maalmoodkooda. Waana markii u horeysey ee la gaarsiiyo habkan ilaa heer qarameed, inkastoo shaqo-bixiyayaal badan oo xaafadeed habkan oo kale ay leeyihiin. Waxana la rabaa in la xaqiijiyo ilaa xadka loo baahanyahay ee daryeelidda bulshada lana hubiyo in shaqaaluhu yaqaaniin waajibaadka shaqo-bixiyaha, shaqaalaha, dadka loo adeego, daryeelayaasha iyo waxa dad-weynuhu ka filayaba.

Markaa habkan waxa loogu tala-galay inuu hirgeliyo socodsiinta shaqo wanaagsan waxana la filayaa in shaqaalaha iyo shaqo-bixiyuhu ay garan doonaan habkan iyo sida ay xiriirka u leeyihiin. Habkani waa mid awelba labad ururba ay filayeen. Dawladda Hoose way dhiiri gelinaysaa heerkan iyadoo hore ugu sii soconaysa ka faaiideysiga marba habka cusub ee jira.

Sidee loo adeegsan doonaa habdhaqameedkan?

Hab-dhaqameedkani waa tallaabo hor leh oo ka mid ah hordhaca daryeelka bulshada ee afarta dhul/waddan ee UK. Dawladda Hoose ayaa ka masuul ah diiwaan-gelinta wixii u shaqaynaya ilaalinta bulshada. Diiwaanku wuxuu noqon doonaa kayd ay leedahay bulshadu oo wixii la diiwaangeliyey ay gutaan baahida diiwaanka loo geliyey, ayna u hoggaansamaan ilaa heerka loogu tala-galay hab-dhaqameedka Shaqo ee Shaqaalaha Daryeelka Bulshada.
Dawladda Hoose waxay tilmaami doontaa heerarka loo dejiyey hab-dhaqameedka shaqo ee shaqaalaha daryeelka bulshada iyagoo eegaya wixii shaqo xuma ah, go'aanna ka gaaraya in qofka shaqaalaha ah ee gefaa diiwaanka ku sii jiro iyo in kale.

Muxuu hab-dhaqameedku kuu macnaynayaa?

Haddii aad tahay daryeele bulsho waa inaad leedahay hab-ku-socod si aad u gudato shaqadaada kuuna muuqataa waxa lagaaga baahanyahay inaad fuliso. Aad baa lagugu dhiirinayaa isticimaalka habdhaqameedka si aad u jirabto shaqadaada una eegto meelaha looga baahanyahay inaad sii hagaajso.

Haddii aad tahay shaq-bixiyaha daryeelka bulshada waa in aad ogaataa qaybta lagaa filayo inaad ku dhaqanto qaynuunkeeda shaqo, una taageerto daryeelka bulshada si aad u saraysa. Waxa lagugu guubaabinayaa in aad dulmarto heerarka iyo qorshaha shaqada sida ku cad hab-dhaqameedka loogu tala-galay.

Haddii aad tahay qof ka mid ah bulshada hab-dhaqameedkani wuxuu kaa caawinayaa inaad fahamto sida shaqaalaha daryeelka bulshada uu kuula dhaqmi lahaa. Iyo in shaqo-bixiyuhu ay tahay in uu caawiyo shaqaalaha daryeelka bulshada si ay si fiican xilkooda ugu gutaan.

Hab-dhaqameedka shaqo-bixiyaha daryeelka shaqada

Ujeeddada hab-dhaqameedkani waxay faraysaa masuuliyadda shaqo-bixiyaha ee joogtaynta shaqaalaha adeegga bulshada. Ujeeddada qaynuunka shaqadu guud ahaan waa in la ilaaliyo, horena loo mariyo xiisaha dadka loo adeegayo iyo daryeelayaasha. Hab-dhaqameedkan waxa loo qaatay in lagu wanaajiyo habka intii la beddeli lahaa ama la soo celcelin lahaa nidaamkii hore ugu degsanaa shaqo-bixiyaha, waxaanay xambaarsantahay qaynuun ka ballaaran intii hore, wixii loo baahanyahay iyo tilmaan bixiye taas oo khusaysa shaqaalaynta adeegayaasha. Shaqo-bixiyayaashu waxay masuul ka yihiin in ay hubiyaan fulinta nidaamka shaqada ee ku qoran hab dhaqameedkan, gudbiyaanna adeeg tayadiisu sarayso, horena loo mariyo is aaminka dadweynaha iyo kalsoonida.

Meheradda

Guddiga u Qaybsan Daryeelka Qaranka (The National Care Standard Commission) iyo waaxda u kuurgalka adeegga bulshada (Social Service Inspectorate) waxay si cad u muujin doonaan taageerada daryeelka .

Si ay u gutaan xilka ka saaran dhinaca joogteynta shaqada daryeelka bulshada iyo shaqo bixiyaha arrimaha daryeelka waa in ay:

- Hubsadaan in dadka ku habboonyihiin shaqadooda, la islana fahmo doorkooda iyo masuuliyadda ay qabanayaan.

- Lahaadaan nidaam qoran oo ku tala-gal leh xagga shaqada, kaas oo suurta gilinaya in shaqaalaha daryeelka bulshadu garawsadaan Xarunta Guud ee Arrimaha Daryeelka Bulshada - The General Council (GSCC) ee hab-dhaqameedka shaqaalaha daryeelka bulshada.

- Bixiyaan tababarro iyo fursado hore-u-marineed si loo awoodo in shaqaalaha daryeelidka bulshadu kordhiyo, korna ugu qaado xirfadahooda gaarka ah iyo aqoontoodaba.

- In ay meel dhigaan cusboonaysiyaanna nidaam qoran, oo ku tala-gal leh, si loogu adeegsado halisaha, cunsuriyadda, si-xun u-isticimaalka xoogga aadamiga ee dhinacyada shaqada iyo iyo sida loo falaba.

- La kordhiyo hab-dhaqanka Xarunta Guud ee Arrimaha Daryeelka Bulshada (GSCC) wax-qabadkeeda ku aaddan shaqaalaha daryeelka bulshada, dadka loo adeegayo, daryeelayaasha iyo la shaqaynta Xarunta Guud ee Arrimaha Daryeelka Bulshada, si loo sii socodsiiyo hawleheeda.

1 Haddaad tahay shaqo-bixiyaha daryeelka bulshada, waa inaad hubsataa in dadka aad qoranaysaa ay ku habboonyihin shaqada daryeelka bulshada fahamsantahayna doorka iyo masuuliyadda ay gudanayaan.

Tan waxa ku guda jira:

1.1 In la isticimaalo shaqabixin sax ah iyo kala xulasho, taas oo qof keliyihi leeyahay aqoonta ku habboon iyo xirfadaha. Kaas oo ah ka keliya ee u qalma shaqada, ahna qura ee shaqada la qorayo.

1.2 In la eego haddii uu dembi galay, diiwaanka uu ku jiro, la jirrabo inuu shaqada ku habbooyahay intaan ballanta loo dhigin.

1.3 Raadinta iyo bixinta dammiinka.

1.4 Siinta shaqaalaha akhbaarta ay u baahanyihiin, doorka iyo xilkooda, qaynuunka khuseeya, qorshaha uruka iyo nidaamka ay raacaan iyo

1.5 Maamulidda shaqaalaha iyo ururka si loo hubiyo tayada sare ee adeegga iyo daryeelkaba.

2 Haddaad tahay shaqo bixiyaha daryeelka bulshada waa in aad leedahay nidaam qoran iyo ku-tala-gal si loo awoodo in shaqaalaha daryeelka bulshadu hanan karaan arimaha Xarunta Guud ee Arrimaha Daryeelka Bulshada (GSCC) habdhaqankeeda ku aaddan Shaqaalaha Daryeelka Bulshada.

Tan waxa ku guda jira:

2.1 Wax-ka-beddelka iyo socodka nidaamka qoran: isku-kalsooni, sinnaan, jirrabaadaha khataraha, maaddooyinka oo si xun loo isticimaalo, kaydin diiwaansan, laaluush laga qaato loo adeegayaasha iyo daryeelayaasha.

2.2 Maamul wanaagga iyo qabqablaha shaqaalaha si uu u taageero shaqo socodsiinta iyo dabeecad wanaagga, taageerina shaqaalaha wixii alaabo ka xumaatay;

2.3 Ku socoshada qorshe wanaagga si loo awaado in shaqaalaha daryeelka bulshadu ka warbixiyaan ilaha kala dhiman ama wixii aan

shaqaynaynin. Taas oo waxyeellayn karta alaabta la keenayo. Isla markaa loo gudbiyo awoodda ku shaqo leh wax-ka-qabadkeeda si loo caddeeyo siday wax-u-qabaan ama dayactirkooda; aadna

2.4 Taageeridda shaqaalaha daryeelka bulshada si loo hubiyo GSCC' hab-dhaqankeeda shaqaalaha daryeelka bulshada, taas oo aan loo baahnayn in tallaabo laga qaado

3 Haddii aad tahay shaqo-bixiyaha Daryeelka Bulshada waa inaad bixisaa tababarro iyo fursado kocbineed si loo awoodo in la kordhiyo, horena loo mariyo xirfadaha shaqaalaha iyo aqoontooda.

Tan waxa ku guda jira:

3.1 In la bixiyo hubsiimo-horleh, tababarro, fursado si loo caawiyo shaqaalaha daryeelka bulshada in ay shaqadooda u qabsadaan si wanaagsan gartaanna doorkooda iyo masuuliyaddooda;

3.2 Tawsiicin wax-barasho iyo tababarro oo la gaarsiiyo daryeelka iy shaqada bulshada taas oo ay ka mid tahay jirrabaado ku saabsan xarumaha shaqadu ka socoto iyo sida loo qabanayo shaqadaba;

3.3 In lagu taageero shaqaalaha jagooyinka ay hayaan ee u diiwaan gashan si loo hanto GSCC shuruudeheeda ee diiwaansan iyo baahida ay u qabto inay sii waddo hore-u-marinta aqoontooda loo tababaray; iyo

3.4 In loogu jawaabo shaqaalaha daryeelka bulshada si munaabsibta haddii ay dalbanayaan caawimo ku saabsan shaqada ay hayaan, iyagoo la' awgeed akhbaaro shaqada ay hayaan ku saabsan oo u diyaar ah.

4 Haddii aad tahay shaqo-bixiye daryeelka bulshada, waa inay kuu diyaar yihiin qoraallo nidaamsan oo ku tala gal leh su loolgula dhaqmo halisaha, cunsiriyadda ama si xun u-isticimaalka xoogga aadamiga iyo sidii wax looga qaban lahaa. Kuwaas oo wax laga beddeli karo markii la doono.

Tan waxa ku guda jira:

4.1 In loo caddeeyo shaqaalaha daryeelka bulshada in baacsiga, dhibaataynta iyo wax kast oo kale oo ka mid ah cunsiriyadda in aan la qaadan karin tallaabo cadna laga qaadi doono wixii ku kaca;

4.2 Dhisitaanka iyo hore-u-marinta hab-socodka shaqada ee loogu tala galay shaqaalaha daryeelka bulshada si looga warbixiyo halista, cunsiriyadda,
si xun u dhaqanka, si xun u isticimaalka xoogga aadamiga iyo sidii wax looga qaban lahaa;

4.3 In loo caddeeyo shaqaalaha daryeelka bulshada, dadka loo adeego iyo daryeelayaasha wixii dagaal wada, hanjebaadda ama gardarro ula imanaya shaqaalah in aanay wax la qaadan koro ahayn. Waana in laga lahaadaa nidaam cad iyo qorshe qayaxan wixii dhibaato ah ee ay geystaan si maamul wanaag ah;

4.4 Taageeridda shaqaalaha daryeelka bulshada kii loogu geysto dhibaato iyo dagaal shaqada dhexdeeda;

4.5 In uu meel kuu yaallo nidaam qoran oo qorshaysan kaas oo kor u qaadi kara shaqaalaha deeqahooda gaarka ah iyo in la simo ayaga dhexdooda; aadna

4.6 Xilliga hubsiimadani socoto ee ay kula joogaan dadka ku shaqo leh nabad-goobeedka iyo dadka loo adeegaagaba waa in ay helaan badhi-taar ku habboon shaqaalaha daryeelka bulshada kuwaas oo ay waxyeelleeyeen maan-dooriyayaashu, siiyaanna tilmaan-raac xilliga ay ku jiraan daawaynta.

5 Haddii aad tahay shaqaale waa in aad kor u qaaddaa GSCC hab-dhaqameedkeeda, gaarsiisana shaqaalaha daryeelka bulshada, dadka loo adeego iyo daryeelayaasha, lana shaqayso GSCC's nidaamkeeda.

Tan waxa ku guda jira:

5.1 In lagu wargeliyo shaqaalaha daryeelka bulshada hab-dhaqameedka iyo masuuliyadda aad u hayso, aadna u hoggaansanaado;

5.2 In lagu wargeliyo shaqaalaha daryeelka bulshada GSCC hab-dhaqameedkeeda ee Shaqaalaha Daryeelka Bulshada iyo masuuliyadda ay hayaanba taas oo ku wajahan hab-dhaqameedka;

5.3 In dadka loo adeego iyo daryeeluhuba ay qabaan, oo ogyihiin hab-dhaqameedkan iyo habkeeda shaqo ee Shaqaalaha Daryeelka Bulshada iyo akhbaarteed ku saabsan wixii ka soo baxa nidaamkeeda iyo in lala xiriiro GSCC hab-dhaqameedkeeda;

5.4 In la tilmaamo GSCC hab-dhaqameedkeeda Shaqaalaha Daryeelka Bulshada ee samaynta go'aan kasta oo xiriir la leh dabeecadda shaqaalaha;

5.5 In lagu wargeliyo GSCC wax kasta oo dhaqan-xumo ah oo la geysto, taas oo keeni karta in la waco si wax laga weydiiyo arrimaha diiwaan-gelinta lagu qorayo, loona sheego in lagu wargelinayo GSCC; iyo

5,6 In lala shaqeeyo GSCC baaritaankeeda iyo maxkamadeheeda, loogana jawaabo si wanaagsan waxyaabaha ay qabaan iyo go'aan wixii ay ka gaartay GSCC.

Shaqaalaha Daryeelka Bulshada

Hordhac

Qoraalkan waxa ku jira habdhaqameedka shaqaalaha daryeelka bulshada iyo shaqo bixiyaha shaqaalaha daryeelka bulshada taas oo qeexaysa sida shaqaaluhu ugu shaqayn lahaayeen dadka ay u adeegaan. Hordhacan oo dib u soo bixi doona waxa loogu tala galay in shaqo bixiyaha iyo shaqaalaha daryeelka bulshadu ay ku wada shaqeeyaan dhammaantood. Hab-dhaqameedkan waxa loogu tala-galay inaad fahamto, tilmaami kartana sida ay arrimuhu kuugu muuqdaan. Adigoo ka mida shaqaalaha daryeelidda bulshada, shaqo-bixiyayaasha, kuwa loogu adeego hab-dhaqankan. Amaba ah qof kale oo ka mida bulshada.

Xarunta Guud ee Dawladda Hoose ee Daryeelka Bulshada (The General Social Care Council) waxay bilowday shaqadeeda 1 Oktoobar 2001. Isla markaa waxa iyana shaqadan bilaabay Dawladda Hoose ee Woqooyiga Ayrlad ee Daryeelka Shaqaalaha (the Northern Ireland Social Care Council), Dawladda Hoose ee Iskotland ee Adeegga Bulshada (the Scottish Social Services Council) iyo Daryeelka Dawladda Hoose ee Weylis (the Care Council for Wales). Dawladda Hoose waxa xil ka saaranyahay sidii ay hore ugu marin lahayd hab-dhaqameedka shaqada ayagoo u wada shaqeeya isku-duubnaan si ay u hormariyaan habka wada shaqaynta, korna u qaadaan heerka adeegidda daryeelka bulshada.

Labada hab-dhaqan ee ka shaqaalaha iyo ka shaqo-bixiyaha waxay ku qeexanyihiin qoraalkan waayo waxay u yihiin xuddun ama muraayad masuuliyadda looga baahanyahay.

Waa maxay hab-dhaqameedkani?

Hab-dhaqameedka Shaqaalaha Daryeelka Bulshada waa qoraal taxana ah oo qeexaya ilaa heer shaqo gudasho oo tababaran iyo hab-raaca shaqada ee looga baahanyaahy shaqaalaha daryeelka bulshada si ay u gutaan shaqo maalmeedkood. Waa markii u horeysey ee la gaarsiiyo xadkan ilaa heer

qaran ah, inkastoo shaqo-bixiyayaal badani ay leeyihiin mid aad ugu eg. Ujeeddaduna waa in la hubiyo baahida daryeelka bulshada, lana xaqiijiyo shaqaaluhu in ay yaqaaniin sida ay u dhaqmaan shaqo-bixiyayaasha daryeelayaasha iyo waxa dadku ka filaayo.

Hab-dhaqameedkan shaqo-bixiyaha ee shaqaalaha daryeelka bulshada waxa loo dejiyey masuuliyadda shaqo-bixiyaha ee waafaqsan qawaaniinta shaqaalaha daryeelka bulshada. Marlabaad habkani waa markii ugu horaysey ee uu soo baxo ilaa xad heer qaran ah. Waxana loo baahanyahay inuu adeegsado shaqo-bixiyuhu, taageerana shaqaalaha daryeelka bulshada si uu hab-dhaqameedka shaqadooda ula qabsado, tallaabana uga qaado wixii ka soo bixi waaya xilka laga rabo.

Markaa habkan waxa loogu tala-galay inuu hirgeliyo socodsiinta shaqo wanaagsan waxana la filayaa in shaqaalaha iyo shaqo-bixiyuhu ay garowsan doonaan habkan iyo sida ay xiriirka u leeyihiin. Dawkadda hoose way dhiiri gelinaysaa, horena-u-marinaysaa heerka hab-dhaqameedka ee hadba jira.

Sidee loo adeegsan karaa hab-dhaqameedkan?

Hab-dhaqameekani waa tallaabo hor leh oo ka mid ah hordhaca daryeelka bulshada ee afarta dhul ee UK. Dawladda Hoose ayaa ka masuul ah diiwaan-gelinta wixii u shaqaynaya ilaalinta bulshada. Diiwaanku wuxuu noqon doonaa kayd ay leedahay bulshadu oo wixii la diiwaangeliyey ay gutaan baahida diiwaanka loo geliyey, ayna u hoggaansamaan ilaa heerka loogu tala galay Hab-dhaqmeedkan ee Shqaalaha Daryeelka Bulshada.

Dawladda Hoose waxay tilmaami doontaa heerarka loo dejiyey hab-dhaqameedka shaqo ee shaqaalaha daryeelka bulshada iyagoo eegaya wixii shaqo xumo ah, go'aanna ka gaaraya in qofka shaqaalaha ah ee gefaa diiwaanka ku sii jiro iyo in kale.

Muxuu hab-dhaqameedku kuu macnaynayaa?

Haddii aad tahay daryeele bulsho waa inaad leedahay hab-ku-socod si aad u gudato shaqadaada kuuna muuqataa waxa lagaaga baahanyahay inaad fuliso. Aad baa lagugu dhiirinayaa isticimaalka habdhaqameedka si aad u jirrabto shaqadaada una eegto meelaha looga baahanyahay inaad sii hagaajiso.

Haddii aad tahay shaq-bixiyaha daryeelka bulshada waa in aad ogaataa qaybta lagaa filayo inaad ku dhaqanto qaynuunkeeda shaqo, una taageerto daryeelka bulshada si aad u saraysa. Waxa lagugu guubaabinayaa in aad dulmarto heerarka iyo qorshaha shaqada sida ku cad hab-dhaqameedka loogu tala-galay.

Haddii aad tahay qof ka mid ah bulshada hab-dhaqameedkani wuxuu kaa caawinayaa inaad fahamto sida shaqaalaha daryeelka bulshada uu kuula dhaqmi lahaa. Iyo in shaqo-bixiyuhu ay tahay in uu caawiyo shaqaalaha daryeelka bulshada si ay si fiican xilkooda ugu gutaan.

Hab-dhaqameedka shaqo-bixiyaha daryeelka shaqada

Ujeeddada hab-dhaqameedkani waxay faraysaa in la juliyo rajada shaqaalaha addeegga bulshada, lalana socodsiiyo dadkda loo adeegayo iyo dadweynaha waxay ka filayaan shaqaalaha adeegga dadka. Qoraalkanina wuxuu ka mid yahay qawaaniin ballaaran oo wada socota, sida shaqada loo qabanayo iyo nidaamka shaqo-bixiyaha iyo ku-tala-glakiisa ee ay shaqaalaha adeegga bulshadu gudan doonaan. Shaqaalaha daryeelka bulshadu waxay masuul ka yihiin in ay hubsadaan in aan hab-daqankoodu hoos u dhicin sida loogu tala galay hab-dhaqameedkan, mana jiro wax ka dhiman ama iyaga wax u dhimaya gaarahaan.

Meheradda

Xarunta Guud ee Badbaadada Shaqaalaha (the General Social Care Council) waa inay hanataan hab-dhaqameedkan. Taas oo isla markaa dhici karta inay tallaabo ka qaadaan dadka fulin waaya ujeeddada ay u diiwaan-gashanyihiin ee ah shaqada.

Shaqo-bixiyayaasha shaqaalaha daryeelka bulshada waxa looga baahanyahy inay adeegsan karaan hab-dhaqameedkan tallaabana ka qaadaan shaqaalahu hab-fulintooda shaqo.

Shaqaalaha daryeelka bulshadu waa in:

- Aad ilaalisaa xuquuqda korna u qaaddaa xiisaha loo adeegayaasha
- Qorshaysaa, dhistaa aanad socodsiisaa aaminaadda iyo kalsoonida loo adeegayaasha iyo adeegayaasha.
- Kor-u-qaaddaan madaxbannaanida loo adeegayaasha markaad adigu hayso ilaa inta laga badbaadin karo khatarta iyo waxyeelooyinka.
- Xilqaanto xuquuqda loo adeegaha marka la raadinayo in la hubsado in iyagu naftooda waxba yeelin, dad kalena wax u geysan karin.
- Cusboonaysiiso aaminaadda bulshada iyo isku-kalsoonida ee daryeelka adeegga bulshada, aadna
- Suuradiso tayada shaqadooda xilkeedana qaaddo socodsiinta iyo wax-ka-beddelidda aqoontooda iyo xirfaddooda.

1 Haddaad tahay shaqaale daryeele bulsho, waa in aad ilaalisaa xuquuqda, korna u qaaddaa xiisaha loo adeegayaasha iyo daryeelayaasha.

Tan waxa ka mid ah:

1.1 In aad u qaabisho qof walba gaar ahaantiisa;

1.2 Xilqaan, kor-u-qaadidda aragtida qofka iyo siduu jeclaan lahaa inay u dhaqmaan kuwa loo adeego iyo daryeelayaashuba wixii suurta gal ah;

1.3 Lagu taageero loo adeegayaasha xuquuqdooda si loogu xakameeyo noloshooda mar walbana looga waramo xulashooyinka uu leeyahay ee adeegga ay helaan;

1.4 Xilqaanka iyo socodsiinta sharafta iyo asturaadda loo adeegayaasha;

1.5 Kor-u-qaadidda sinnaanta dadka ee loo adeegayaasha iyo adeegayaasha; iyo

1.6 Xilqaanka dhinacayada kala duwanaanta, dhaqammada iyo qiimaha lagu kala duwanaanta.

2 Haddaad tahay shaqaale daryeele bulsho, waa in aad qorshaysaa, dhistaa aadna socodsiisa aaminaadda isku kalsoonida ee loo-adeegayaasha iyo adeegayaasha;

2.1 Ahaanshaha qof daacad ah oo aaminaadda ku fiican;

2.2 Wada-xiriir habboon, furan, sax ah oo toosan;

2.3 Xilqaanka akhbaarta gaarka iyo u bandhigista loo adeegayaasha iyo adeegayaasha wakaaladda nidaamkeeda ku saabsan asturaadda;

2.4 Ahaanshaha qof la-isku-hallayn karo, waxna loosheegi karo;

2.5 Weyneyso qabashada shaqada, heshiisyada iyo qorshayaasha iyo marka aanay ahayn suurta gal gudashadeedu, adigoo u sheegaya sababta loo-adeegayaasha iyo daryeelayaasha;

2.6 Saxeexitaanka war-jira kaas oo keeni kara xafiiltan ama xiise. Iyo hubsiimada sidii aanay waxba uga beddi lahayn go'aankaagii ama falkaagii hore; iyo

2.7 U-hoggaansanaanta nidaamka iyo ku-tala-galka aqbalaadda hadiyadaha iyo lacagta kaaga timaadda loo-adeegayaasha iyo daryeelayaash.

3 Haddaad tahay shaqaale daryeele Bulsho, waa inaad kordisaa madaxbannaanida loo-adeegaha marka aad masuul ka tahay badbaadadooda inta awooddaada ah.

Tan waxa ku guda jira:

3.1 Kor-u-qaadidda madax-bannaanida loo-adeegayaasha iyo jirrabaaddooda si loo fahmo, loogna shaqeeyo xuquuqdooda;

3.2 Adeegsiga qorshe dhisan iyo ku-tal-galkiisa si loo cariyo waxna looga qoro halista, gefka, cunsuriyadda iyo xun uga faaiideysiga aadamiga iyo sidii wax looga qaban lahaa;

3.3 Tixraaca falitaanka iyo ku tala-galkooda hindisan taasoo hore kuu wadaysa, dadka kalena ka hor-joogsanaysa dagaalka iyo gefka xilliga shaqada;

3.4 Foojignaan la gaarsiiyo shaqo-bixiyahaaga, awood kale oo foojignaantaasi khusayso ama kuwa la shaqeeya dhibaatooyinka nooca foojignaantaa u baahan, taas oo keeni karta in daryeelka badbaadada la soo dhoweeyo ama la keeno;

3.5 Wargelin la gaarsiiyo shaqo-bixiyahaaga ama awood kale oo ku habboon marka qof jalahaaga ahi ay dhici karto in aanu nabad qabin ama ay waxyeello soo gaarayso habraaca adeegga la fulin lahaa;

3.6 U-hoggaansanaanta shaqo-bixiyaha caafimaadkiisa iyo nidaamka nabad-goobeedka oo ay ku jiraan aaladaha oo si khaladaha loo isticimaalo;

3.7 Taageeridda loo-adeegayaasha iyo daryeelayaasha si uu u cawdo, iyadoo aad cabooshinka u qaadato si kama dambays ah, ugana jawaabto ama aad u gudbiso qofka ku habboon; iyo

3.8 Aqoonsato una isticimaasho si masuuliyad leh awoodda shaqadaada iyo sida aad ula shaqaynayso loo-adeegayaasha iyo daryeelayaasha.

4 Haddii aad tahay shaqaale daryeele bulsho, waa in aad xilqaantaa xuquuqda loo-adeegayaasha marka la raadinayo in la hubsado in naftooda iyo dadka kale midna wax-yeello gaarsiin.

Tan waxa ku guda jira:

4.1 Aqoonsiga in loo-adeegayaashu in ay xaq u leehihiin gelitaanka khatarta laguna caawiyo sharaxaaddooda lana maamulo wixii u gaarsiin kara khatar dhab ah isaga iyo kuwa kaleba;

4.2 Tixraaca khatarta jirrabaaddeeda ku-tala-galkeeda iyo nidaamkeeduba waa in la qiimeeyaa haddii uu isku keenay loo-adeeguhu iyo haddii ay cid kale kasbatay;

4.3 Ka qaaditaanka tallaabo si loo yareeyo khatarta ku iman karta loo-adeegayaasha si looga badbaadiyo dhaawac markaa taagan ama ku dhici kara; iyo

4.4 Hubsiimo ah in jalayaal isaga dhigma xogagaalnimadaa ay ka soo warbixiyeen go'aanka iyo wixii ku taxaluqa jirrabaadda khatarta.

5 Haddaad tahay shaqaale daryeele bulsho, waa in aad taageertaa aaminaadda bulshada iyo kalsoonida ka jirta adeegga daryeelka bulshada dhexdeeda.

Gaar-ahaan adigu waa inaad:

5.1 Gef, iska-indatirtaa ama aad dhaawacdaa loo-adeegayaasha, daryeelayaasha ama jalayaashaada;

5.2 Si-xun uga faaiideysataa loo-adeegayaasha, daryeelayaasha ama jalayaashaada;

5.3 Ku gefto la-aaminta loo-adeegayaasha iyo daryeelayaasha ama ay kuu furanatahay warbixinta gaarka ah ee ku saabsan iyaga ama hantidooda dhismeed, guriga ama xarunta-shaqadu;

5.4 Uga diyaarsato si aan habboonayn shakhsiyad qaraabannimo loo-adeegayaasha;

5.5 U cunsuriyadayso loo-adeegayaasha, daryeelayaasha ama jalayaashaada si sharci-darro ah;

5.6 Cambaarayn cunsurinimo oo ay korka kaaga tuureen loo-adeegayaashu, daryeelayaashu ama jalayaashaadu taas oo aan sharciga waafaqsanayn, ujeedda cadna lahayn;

5.7 Naftaada ama dadka kale oo aad gelisey khatar aan loo baahnayn; ama

5.8 U dhaqanto si uun, shaqada dhexdeeda ama debeddaba, taas oo su'aali ka furantahay inaad ku habboontahay shaqada adeegga daryeelka bulshada.

6 Haddaad tahay shaqaale daryeele bulsho, waa inaad suuradisaa tayada shaqadaada gudataana masuuliyadda la doonayo inaad socodsiiso, aqoontaada iyo xirfaddaadana kor u sii qaaddo.

Tan waxa ku guda jira:

6.1 Gudashada dhawr shaqo-fal oo isu-dhigma una wada shaqada si sharciga waafaqsan, nabadqaba, taasoo weliba ah mid wax-ku-ool ah;

6.2 Socodsiinaya kaydadka qoraallo dhalliil la', saxan, kuwaas oo looga baahanyahay hab loo dejiyey shaqadaada;

6.3 Wargelin shaqo-bixiyahaaga ama awoodda ugu-habboon ee dhibaatada shakhsiyadeed taas oo laga yaabo inay waxyeellayso awooddaada dhammaystirka shaqada iyo badbaadadaada;

6.4 Raadsashada caawimo aad ka hesho shaqo-bixiyahaaga ama awoodda ugu habboon haddii aanad u qaban karin shaqada sinaba ama aanad hubin sida aad u socodsiinayso arrimaha shaqada ku saabsan;

6.5 U-shaqaynta hab furan, lana shaqayso jalayaashaada, ulana dhaqanto si xilqaan mudan;

6.6 Aqoonsato inaad weli baaqi ku tahay masuuliyadda shaqada iyo inaad wakiil ka tahay shaqaalaha kale;

6.7 Aqoonsato, xilqaantana doorarka iyo khabiirnimada shaqada ee ka soo jeedda wakaaladaha kale iyo la shaqayntooda xubinnnimo; iyo

6.8 Inuu kuu socdo tababar kuu qalmaa si aad u socodsiiso una siyaadiso aqoontaada iyo xirfadahaaga una fidiso meelaha kale ee waxbarashada iyo kobcintu ka socoto.

General Social Care Council
Goldings House
2 Hay's Lane
London
SE1 2HB

020 7397 5100
www.gscc.org.uk

© Copyright General Social Care Council 2002